



Allahayow adaa salaam ah, oo salaamtu kaa timid, waad hor ahaatay, waxaad tahay Ilaaha Jalaalka iyo Karamka

Thawbaan Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu ahaa markuu salaadda ka baxo saddex jeer buu istiqfaarsan jiray, wuxuuna yiri:(Allahayow adaa salaam ah, oo salaamtu kaa timid, waad hor ahaatay, waxaad tahay Ilaaha Jalaalka iyo Karamka u saaxibka ah). waliid wuxuu yiri waxaan ku iri awsaaci: qaabkay ahayd istiqaartu? wuxuu yiri: Astaqfirullaah, Astaqfirullaah.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu dhihi jiray markuu salaadda ka baxo: Astqfirullaah, Astaqfirullaah, Astaqfirullaah. Ka dibna Rabigii ayuu waynaynayey, wuxuuna oran jiray: Allahayow adigaa salaam ah, oo salaamtu kaa timid, waad kor ahaatay, waxaad tahay Ilaaha Jalaalka iyo Karamka u saaxibka ah, Ilaahay waa Saalim oo sifaadkiisu waa kaamilka, wuu ka nasahan yahay ceeb iyo nusqaan, isaga ayaa laga dalbaa inuu kaa nabad galiyo sharta aduun iyo tan aakhiro cid kal lagama dalbo, Ilaahay khayrkiisu waa badan yahay labada daaroodba, Ilaahay waa kan u saaxibka ah waynaan iyo ixsaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/10947>

